KULAN CILMIYEED


# Dhaqaalaha Islaamka

## & Saamaynta uu Bulshada Ku Leeyahay

مسجد علي متان



2014 M - 1435 H




ٱلَّذِينَ يَأۡكُلُونَ ٱلرِّبَوٰاْ لَا يَقُومُونَ إِلَّا كَمَا يَقُومُ ٱلَّذِى يَتَخَبَّطُهُ
ٱلشَّيۡطَٰنُ مِنَ ٱلۡمَسِّۚ ذَٰلِكَ بِأَنَّهُمۡ قَالُوٓاْ إِنَّمَا ٱلۡبَيۡعُ مِثۡلُ ٱلرِّبَوٰاْۗ وَأَحَلَّ
ٱللَّهُ ٱلۡبَيۡعَ وَحَرَّمَ ٱلرِّبَوٰاْۚ فَمَن جَآءَهُۥ مَوۡعِظَةٞ مِّن رَّبِّهِۦ فَٱنتَهَىٰ فَلَهُۥ مَا
سَلَفَ وَأَمۡرُهُۥٓ إِلَى ٱللَّهِۖ وَمَنۡ عَادَ فَأُوْلَٰٓئِكَ أَصۡحَٰبُ ٱلنَّارِۖ هُمۡ فِيهَا
خَٰلِدُونَ ٢٧٥

**Suurat al-Baqra**

## TUSMADA BUUGGA

HORDHAC………………………………………………………. iii

**QAYBTA 1-AAD:** ……………………………………………..……..1
"Alle iibka ayuu Xalaaleeyey Ribadana wuu Xaraantimeeyey"
Sheekh Maxamed Sheekh Cumar Dirir

**QAYBTA 2-AAD:** ……………..…………………………..……….8
"Bangiyada Islaamka iyo Kaalinta ay ku Leeyihiin Kobcinta Dhaqaalaha"
Sheekh Cabdiqani Xuseen

**QAYBTA 3-AAD**………………………………………………………17
"Waxyaabaha u Gaarka ah Dhaqaalaha Islaamka" Sh. Ciise Maxamuud Cabdillahi

**QAYBTA 4-AAD**………..…………………………..….........22
"Shaqaysiga Xalaasha ah iyo Is-taageeridda Bulsho" Sh. Maxamed Cali Jaamac (Gadhle) iyo Sh. Cabdiraxmaan Axmed Aw Cabdi

**QAYBTA 5-AAD**……………………………..…………......29
"Guusha Baananka Islaamka & Fashilka Bangiyada Ribada"
Sh. Almis Yaxye Xaaji Ibraahim.

**Muxaadarada 6-AAD** ……………………..……………….….….…35
"Dood Cilmiyeed ku saabsan Somaliland: Baananka Ribada ah & kuwa Islaamiga ah" Sheekh Maxamed Salaan, Prof Mubaarak Ibraahim Aar, Sheekh Maxamed Cali Biixi & Sheekh Xasan Cabdi Salaan

## HORDHAC

Illaahay ayaa mahad oo dhani u sugnaatay, Illaaha inoo tilmaamay dariiqa toosan, Illaaha inoo kala cadeeyay nidaamka nolasha bani aadamku ku guuleysanayo iyo nidaamka ay ku hoogayso. Naxariis iyo nabad-gelyo ha ahaato rasuulkeena Muxammad (SCW) dushiisha. Rasuulka ina soo gaadhsiiyay farriinta cad ee inagu hagaysa dariiqa guusha if iyo aakhiraba.

Intaa kadib, Kitaab-yarahani waxa uu si qoto dheer uga hadli doonaa ribada iyo mawqifka uu Islaamku ka taagan yahay.

Sanadkii 2014 waxa dalka ka bilaabmay olole lagu doonayo in dalka laga hirgeliyo bangiyada ku shaqeeya ribada. Buuggan oo ka kooban muxaadarooyin xidhiidh ah oo lagu qabtay isla sannadkaas masaajidka Cali Mataan waxa uu ka hadlayaa khatarta if iyo aakhiro ee ay leedahay ribadda.

Muxaadarooyinkan waxa soo jeediyay culimada waaweyn ee dalka iyo aqoonyahano cilmii dheer u leh nidamka dhaqaalaha ee Islaamka.

Buuggani waxa uu qofka akhriya siinayaa aqoon qoto dheer oo la xidhiidha ribada, khatarta ribada, nidaamka dhaqaale ee Islaamka, kaalinta bangiyada Islaamku ka qaataan kobcinta dhaqaalaha iyo mawduucyo badan oo faaiido leh.

# QAYBTA 1-AAD

## "Alle iibka ayuu Xalaaleeyey Ribadana wuu Xaraantimeeyey"

## "وأحل الله البيع وحرم الربا"

**Soo-Jeedinta: Sheekh Maxamed Sheekh Cumar Dirir**



# Muxaadarada 1-aad

## Alle iibka ayuu Xalaaleeyey Ribadana wuu Xaraantimeeyey

### Hordhac

Sheekhu wuxuu muxaadarada ku bilaabay xadiiskii nabiga (SCW) ee macnihiisu ahaa; ribada, sinada iyo khamriguba way faafi doonaan waxaana iman doona wakhti qof waliba ribo cuno oo ka ugu yar boodhkeedu soo gaadhi doono. Wakhtigaas oo ribada, sinada iyo khamriga dadku u qaadan doonaan ilbaxnimo iyo horumar.

Waxaa kale oo sheekhu sheegay: In Alle subxaanahu hinaaso (hinaase isaga u qalma sarreeye) oo uu ka hinaaso qofku markuu xaaraan iyo waxaan banaanayn ku dhaco.

Rabbi Sarreeeye inooma diido wixii dani inoogu jirto ee wax kasta oo dani (if iyo aakhiroba) banii aadamka ugu jirto waa u banneeyey. Arintuna maaha sida dadka qaar leeyihiin ribada horumarbaa lagu gaadhaaye aynu qaadano oo sidii baruurta iyo jiidhka isku cunno oo caalamka wax la qabsano si aynaan u hadhin. Haddii dadka qaar leeyihiin waxaa dib inoo dhigay deyn la'aan waxaa xaqiiqo jirta ah in deyn la'aan la shaqaysan karo sida hadaba dadkeena inta badani iyagoon baanan waxba ka qaadan u shaqyastaan.

Alle subxaanahu wadada toosan iyo ta qoloocanba waa ina tusay ikhtiyaarna waa inna siiyey, ikhtiyaarkaasina waa aasaaska Alle inagu imtixaamayo ee laynagu kala saari doono marka noloshan adduunyadu dhamaato. Waxa kale oo sheekhu soo qaatay xadiiskii macnihiisu ahaa xaaraantuna way caddahay xalaashuna way caddahay wixii labadaa u dhexeeyana waa in layska jiro.

## Shareecadda Islaamka

- Shareecada Islaamka waxaa loo dejiyey inay dadka dhibka ka joojiso khayrkana dhiiriso.
- Wadada badbaadadu way caddahay markaa waa in laga dheeraado wax kasto oo dhibaato qofka diintiisa ku keenaya.
- Qofka dhawrsani waa ka Alle dhawro waana inuu Alle u mahadnaqo maadaama oo uu xumaan iyo xaaraan ka dhawray.
- Ku dedaalida xalaashu waa waajib Illaahay rusushiisii iyo muuminiintaba uu faray, qofkuna inuu ka shakiyo maaha wixii Illaahay u qoray ee risiq ah, waayo markasta wuu helayaa oo sida mawdku u daba socdo ayaa risiqiisuna u daba socdaa.

## Faa'iidooyinka Xalaal-Cunista

- In quluubtu ku hagaagto.
- In lagaga badbaado halaaga
- macaankaa iimaanka oo lagu gaadho
- In lagaga badbaado hilibka xaaranta ku baxo oo naarta lagu jaro.
- Ducada oo la aqbalo

## Ribadda

Ribada macnaheedu luuqad ahaan waa siyaado (dulsaar). Sharci ahaana waa siyaado (dulsaar) waxyaabo gaar ah, sida amaahda iyo laba shay laysku badalanayo oo la kala badiyo iyadoo in la kala badiyo aanay ahayn.

## Noocyada Ribada

1. **Ribaa Al-Fadli** (ribada gasha raashinka iyo lacagaha isku midka ah) shuruudeeduna waa is leegaysiin iyo in markiiba la kala qaato
2. **Ribaa Al-Nasii'ah** (Deynta oo lacag la dul saaro) Carabtii hore iyo Yuhuuda ayaa isticmaali jiray. Xoolaha nool iyo lacagtaba way ku kala qaadan jireen.

## Ribada: Xukunka, Xikmadda, Daliiladeeda iyo Dhibkeeda

1. Alle bayca (iibka) ayuu xalaaleeyey ribadana waa xaaraantinimeeyey.
2. Akhlaaqda iyo iyo ruuxdaba way xumaysaa (qanigii ayaa faqiirkii ku shaqaysanaya).
3. In dhaqaalihii loo jiheeyo jiho aan Alle iyo Rasuulkiisa midna ogolayn.
4. Maalkii Muslimiinta oo gacanta cadawgooda galay, ribadii kasoo baxdayna markay diideen hub Muslimka lagu laayo la siistay.
5. Ribadu waa dhaqanka Yuhuudda
6. Dadka ribada cunaa aakhiro waxay imanayaan iyagoo sidii qof la derderay (waalan) ah.

7. Ribada dalka iyo maalka lagaga shaqeeyaaba waa bilaa barako (barako ma jirayso inta ribo jirto).
8. Qofka ribada cunaa waa qof Alle subxaanahu dagaal kula jira.
9. Nacdasha (naxariis ka fogaynta) Alle waxay dusha ka saarantahay cidda ribada cunta, markhaatigeeda gasha iyo cidda u kala qortaba
10. Cidda ribada cuntaa Alle kamay cabsan.
11. Ribadu waa waxyaabaha cadaabal qabriga sababa.
12. Ribadu waa waxyaabaha ugu waaweyn ee umadaha lagu halaago.
13. Ribadu waa waxyaabaha ummadaha lagu dooriyo.
14. Ribadu waa70 baab (qaybood) shirkiguna waa la mid.
15. Ribadu way ka darantahay 36 jeer oo qofku sinaysto, ta ugu sahlanina waa inuu ninku hooyadii wax kadayo (ka sinaysto).
16. Maalka ribadu gasho sadaqadeeda Alle ma aqbalo.
17. Ducada riba cunaha Alle ma aqbalo.
18. Ribadu dhaqaalaha way dib dhigtaa ee ma horumariso.
19. Alle waxyaabo wanaagsan oo ay heli lahaayeen ayuu kaga joojiyaa cidda ribada cunta.
20. Dulumaadka (mugdiyada) ugu waaweyn weeye ribadu.
21. Ribadu waxay kala dhex gashaa qofka iyo khayrka, waayo ujeedada deynta Islaamku ka leeyahay maaha adduunyo ee waa samo-fal.
22. Ribadu waxay dishaa naxariista.

## Faa'iidooyinka aynku casharkan ka qaadanayno

**1.** In lagu joogsado daliilada go'an ee Alle subxaanahu ku xaaraantinimeeyey ribada.

2. In laga dheeraado caadooyinka jaahiliga ah, Allena la raalli galiyo.
3. In ribadu tahay sida foosha xun ee Alle u sheegay.
4. In xayawaanka nool laysku iibin karo.
5. Sarifka ribo ma galayso haddii markiiba la kala qaato.
6. Ciinadu inaanay bannaanayn.
7. Wanaaga Islaamka iyo naxariistiisa.
8. Inaan lala macaamilin loona shaqayn baan ribo ku shaqeeya.
9. Share (saamiga) ka baanka ribada ku shaqeeya inaan la iibsan Karin.
10. Caymisku inuu xaaraan yahay.

**Maxaa Badal Noqon Kara?**

1. **Qardul xasan** (deyn aan wax dulsaar ah lahayn) oo la kala qaato layskana soo celiyo mudada lagu ballamay.
2. **Mudaraba** (wada shaqaysi)
3. **Muraabaxa** (Alaab kala iibsi faa'iido laysa saarayo)

**Xalka**

1. Raxmadi inay jirto oo aan ummadda faa'iido badan la saarin
2. Baananka Islaamiga ah inaanay dadka ladan wax siin ee dadka faraha madhana caawiyaan iyagoo wixii damaanad ah ka qaadaya.
3. In shareecadda inta la hubo ee laysku waafaqsanyahay la waafajiyo baananka Islaamiga ah.

**Talo soo Jeedin**

Dadka gudaha iyo dibaduba inaanay la maacaamilin baananka ribada ku shaqeeya ee ay la macaamilaan kuwa Islaamiga ah ama lacagta ganacsi xalaal ah kaga shaqaystaan si ummadda xoolaheedu xalaal u noqdaan.

# QAYBTA 2-AAD

# "Bangiyada Islaamka iyo Kaalinta ay ku Leeyihiin Kobcinta Dhaqaalaha"

# "البنوك الإسلامية ودورها في تنمية الإقتصاد"

**Soo-Jeedinta: Sheekh Cabdiqani Xuseen**



# Muxaadarada 2-AAD

## Bangiyada Islaamka iyo Kaalinta ay ku Leeyihiin Kobcinta Dhaqaalaha

**Waxanan halkan idiinku soo gudbinaynaa Mowduucii 2-aad ee Nadwadii xidhiidhka ahayd ee ciwaankeedu ahaa "Nidaamka Dhaqaalaha Islaamiga ah iyo Saamaynta uu ku leeyahay Bulshada" oo ka dhacday Masjid Cali Mataan 02 April – 07 April, 2014.**

Waxaana qoraalkan laga diyaariyay Muxaadarada "Bangiyada Islaamka iyo kaalinta ay ku leeyihiin Kobcinta Dhaqaalaha" – waxana soo jeedinaya Sh. Dr. Cabdiqani Xuseen.

"Bangiyadu waa wax inagu cusub guud ahaan, gaar ahaan kuwa Islaamiga ah. Kelmadda "Bank" waa mid laga keenay erey Talyaani ah, oo macnihiisu yahay Miiska. Bangiyadu waxay ku bilaabmeen hab sarifle oo kale ah ku dhowaad 5 Qarni kahor. Niman Yuhuud ah ayaana bilaabmay. Bangigii ugu horreeyay ee hannaanka casriga ah waxa uu bilaabmay 1587-kii, waxaana laga hirgeliyay dalka Talyaaniga.

Bangi Islaami ah waa hay'ad (mu'asasad) maalka ka shaqaysa, dadka u kaydisa lacagtana ugu maalgelisa, iyada oo mar walba ku taagan Shareecada.

Ujeedada Baanka Islaamiga ah waa in uu kor u qaado hannaanka dhaqaale, fursad in uu qofka siiyo hab uu lacagtiisa ku maalgeliyo oo waafaqsan Shareecada.

Marxalado kala duwan ayaa Baanka Islaamiga ah soo maray. Bangigii ugu horreeyay ee ribo ah ee dalalka Muslimiinta ah la keeno, waxa laga furay Masar. Bangigii ugu horreeyay ee Islaamiga ahaa waxa u ahaa Bank al-Islaami li Tanmiyah, waxaana isugu tegay dowladaha Islaamka dhammaantood. Waa Bangi la shaqeeya Xukuumadaha & Shirkadaha. Bank Dubai al-Islami ayaa ugu horreeyay mid fardiyaadka la xidhiidha oo dadka shakhsiyaadka u fura mucaamalaad.

Kahor Bangiyada waxa jiray dedaalo badan oo ku saabsan sidii loo hirgelin lahaa bangiyo Islaami ah. Guumeysigii Ingiriiska ayaa [wadamada Islaamka] ka hirgeliyay bangiyada ribada ah; waxana uu ku hirgeliyay falsafad ah "Horumar lama samayn karo dhaqaale la'aan, dhaqaalena lama samayn karo bangiyo la'aan; bangiyaduna ma shaqeyn karaan ribo la'aan."

Bangiyada ribadu waxay ka ganacsadaan qof lacag haysta oo loo maalgeliyo oo la siiyo qof deyn raba. Tusaale ahaan, qofka dhigtay baan ribo ah lacag gaadhaysa 10 kun oo Dollar, waxa loo saarayaa 2-10%, mid kale oo raba 10 kun ayaa isna la ammaahinayaa oo laga qaadayaa percentage kale. Farqiga labadaasi ayuu baanku ka sameynayaa faa'iidada.

Waxa markaasi dhalatay fikrad ah in la bilaabo Baananka Islaamiga ah oo dadku aaminaan, waxna u maalgeliya. Sannadadii u horreeyay ee Bangiyada Islaamiga ah, waxay ku jireen baqasho ah 'ma hirgeli doonaan?' Dadku waxay isugu jireen kuwo aaminsan in markaaba ay burburayaan, iyo kuwo u arkayay iftiin meel mugdi ah ka soo baxaya.

Tirakoobyada la soo saaray sannadkii 2012, waxay kor u dhaafayeen bangiyada Islaamiga ah 500, waxana ay intaasi ku gaadheen muddo 30 sannadood gudahood ah. Waxa kale oo jirta bangiyo aasaas ahaan ahaa kuwo ribawi ah, balse markay arkeen koboca bangiyada Islaamiga ah furay adeegyo bangiyo Islaami ah, sida city Bank, HSBC. Waxana soo baxday in Ingiriiska oo kale uu sheegto in uu doonayo in uu noqdo Xarunta Bangiyada Maaliyadda ee Islaamiga ah. Sannadkii 2008 markii ay dhaceen burburka dhaqaale ee ku yimid wadamada reer Galbeedka, gaar ahaan Mareykanka, ayaa hay'ado badan oo [Maaliyadda ka shaqeeya] oo ay leeyihiin (sida dalka France) ay ku taliyeen in la qaato hannaanka Bangiyada Islaamiga ah.

## Baanka Islaamiga ah Muxuu Kaga Duwan Yahay Kuwa Kale?

1. Bangiyada Islaamiga ah iyo kuwa ribadu waxay wadaagaan: labadooduba waxay ka shaqeeyaan maaliyad, waxayna u dhaxeeyaan dadka maalgashiga raba iyo kuwa danyarta ah.
2. Falsafada ay ku dhisan yihiin ayaa kala duwan. Kuwa ribawiga ah waa faa'iido doon [oo keliya] waxana uu ka ganacsadaa kiraynta lacagta. Bangiyada Islaamiga ah waxa uu ka duulayaa mid Caqiido, oo ah in maalka loo isticmaalo sida u Illaahay (swt) oggol yahay. Bangiga Islaamiga ah waxa uu aaminsan

yahay in Maalka Illaahay (swt) leeyahay. Nidaamka Bangiyada ribawiga ah waxa uu aaminsan yahay in lacagta (maalka) uu isagu leeyahay oo uu sida uu doono ka yeeli karo. Waxa uu aaminsan yahay in haddii uu doono uu bisad u dardaarmi karo. Qofka Islaamka ahna waxay diintu u dhigtay sharci, oo xataa qofku marka uu sakaraadku hayo looma oggola in uu maalkiisa wada dardaarmo.

**3.** Bangiga Islaamiga ah tallaabo kasta oo uu qaadayo waxa khasab ku ah in uu raaco Shareecada.

**4.** Baanka Islaamiga ah waxa uu ka fogaadaa ribada, dagista dadka (oo khayaamo lagu qaato maalkooda); dariiq baadil ah in maalkooda lagu qaato. Ribadu waa laba nooc:

  b. **Ribo Nasii'ah** (Quraanka yaaa ka hadlay, Jaahiliga ayaa yaqaanay); waxaana weeyaan $1000 qaado oo $1050 ii soo celi ama in deynta oo caadi ah la siiyo balse marka dambe lagu kordhiyo; waa ribada ay ku dhaqmaan bangiyada ribawiga ah.

  t. **Ribal Buyuuc (ama Fadli)** – jaahiliga ribo umay aqoon. Rasuulku (csw) ayaa sheegay. Lix arrimood ayay gashaa: **(a)** kuwo waa lacag (Silver iyo Dahab) **(b)** afar noocna waa cunto. Waana ta suuqyadeena ku badan. Tusaale, tukaan ayaa waxa laga sii qaataa; shilling ayuu wax ku iibiyaa; killo sonkor ah; kadibna dollar ayuu ku qorayaa. Bishu markay dhammaato dollarkii ayuu ku soo dalacayaa. Waa ribo. Xalku waa in uu shillingka ku qoro kadibna maalinta uu lacagta bixinayo uu sarifo.

**5.** Bangiyada Islaamiga ah waxa uu kaga duwan yahay kuwa kale, cilaaqada ka dhaxaysa macmiilka & baanka. Bangiga ribawiga ah waa deynsade & deyn-bixiye. Ka lacagta ka qaatayna wax buu saarayaa; ka kalena wax buu siinayaa.

6. Ka Islaamiga ah haddii ay tahay xisaab socota (current accounts) waa xidhiidhkaasi oo kale basle aan ribo lahayn. Waanu ku intifaaci karaa baanku. Haddii xisaabtu tahay mid maalgashi "Mushaaraka" wadaag ayaa ka dhaxeynaya.
7. Xidhiidhku waxa uu noqon karaa "Mudaraba" in aad adigu lacag la timaado; baankuna uu kuugu shaqeeyo.
8. Bangiga Islaamiga ah wuxu wax u maalgeliyaa wadaag khasaare & faa'iido.

## Bangiga Islaamiga ah Sidee Ayuu uga Qayb Qaataa Kobcinta Dhaqaalaha?

1. Bangiyada Islaamiga ah waxay qayb weyn ka qaataan maalgelinta heer qaran. Waxay sameeyaan Mashaariic muddo dheer oo keliya aanay eegin faa'iidada ay ka helayaan.
2. Bangiyada Islaamiga ah waxay yareeyaan sicir-bararka.
3. Bangiyada Islaamiga ah waxay maalgeliyaan Mashaariic aanay daneyn kuwa ribadu.
4. Daryeelka Fuqarada. Waxay bixiyaan "Qardul Xasanah" oo ah ammaah aan dulsaar lahayn.
5. Bangiyada Somaliland ka shaqeeyaa hadda waxay sameeyaan Muraabaxa. Waxay u kala baxdaa Muraabaxa basiida (caadi ah) iyo Muraabaxa Murakaba.

## Siday u shaqayso Murabaxadu

Qofka macmiilka ah waxa uu doonayaa in wax loo iibiyo; wixii buu soo arkayaa qiimihiisana soo ogaanayaa. Wuxu ka codsanayaa in Bangigu allaabtaasi iibsado; haddii uu iibsadana waxa uu ballanqaadayaa in uu ka iibsan doono. Tusaale, gaadhi $5000 Dollar ah, oo Macradka baaburta yaalla ayaa bangigu,

haddii uu qofku ku qanco, waxa uu leeyahay bangigu ha soo iibsado; hana iga sii iibiyo; iyada oo qaab hafto ah lacagta lagu bixinayo.

Haddaba, dadka waxa isaga eekaada ribada & faa'iidada uu baanku iibkaasi saartay. Kani waa iib oo Illaahay baa banneeyay, ribadana Illaahay baa xaraantimeeyay.

Dr. Saami Xaamud, oo Suuri ah ayuu ahaa qofkii ugu horreeyay ee nidaamka Muraabaxada bilaabay, waxaana uu ku qoray buuggii uu Jaamacadda ku qalinjebiyay; halkaasina waxa ka qaatay bangiyo badan. Nidaamka Islaamiga ah waxa uu dhiirigeliyaa: Mushaarakada iyo Mudaaraba. Balse waxay bangiyadeenu eegtaan faa'iidada dhow iyo khatar la'aanta.

6. Adeegyada/waxbabadka bangiyada Islaamiga ah waxa kale oo ka mid ah:
    b. **Ijaara**: waxa lagaa kireynayaa, tusaale ahaan, guri 20 sannadood oo ku dhammaanaysa in marka dambe aad la wareegto (lahaansho).
    t. **Al-mushaarakah** (mid caadi ah). Tusaale ahaan, mashruuc ayaad bangiga wada gasheen gaadhaya $50,000; muddo 5 sannadood ah in aad la wada wareegtona waad ku heshiisiin. Camalka wadaaga ah ee ku dhammaada lahaansho. Bangigii ayaa loo badinayaa faa'iido qaybsiga oo waxa uu qaadanayaa in faa'iidadii ah iyo raasamaalkii.
    j. Adeegyada kale ee bangiyada islaamiga ah waxa ka mid ah: **Xawaaladaha**, **Sanduuqa ammaanka** iyo **LC** (oo ah xisaab qofku dibadda wax kaga soo iibsan karo).

**Horumarka Bangiyada Islaamiga ah Maxaa Carqalad ku ah?**

b. Looma abuurin degaan ku habboon. Bangiga dhexe ayaa maamula baananka. Wadamada Islaamka inta badana baananka dhexe waxay ku shaqeeyaan nidaam ribawi ah.
t. Lacag yaraan: Hadda baananka Islaamiga ah ee adduunku waxay ku shaqeeyaan lacag gaadhaysa 2 Tiriliyan, waana lacag aad u yar marka la garab dhigo kuwa ribada ah.
j. Shaqaaale ku filan ma haystaan.
x. Bangiyada ka jira Hargeysa, waxay ka cowdaan macaamiisha. Waxay qaarkood isku dayaan in ay sameeyaan khiyaamo. Tusaale, Murabaxa ayuu gelayaa. Waxana uu heshiis hoose la gelayaa meheradii wax laga iibsaday, oo uu odhanayaa allaabtii aan kuu soo celiyo ee lacagtii i sii marka uu baanku kaa iibsado. Sidoo kale gefaf (akhdaa) ayaa ka dhaca baananka, waana in qofku iska ilaaliyo gefafkaasi, oo uu barto waxa uu ka ganacsanayo. Wakhtigii Islaamka (casriyadii dhexe) waxa soo maray dad wareega oo hubiya qofka ganacsada ah in uu garanayo sharci ahaan sida uu u ganacsanayo.

Waxa muhiim ah in la dhiirigeliyo hanaanka maaliyadeed ee Islaamiga ah ee wadanka ka hirgelay. In laga hortago isku dayada dadka ribada lagu cunsiinayo. Dastuurka Somaliland qodobadiisa aas-aasiga ah waxa ku dhigan in waxkasta oo ka hor imanaya shareecada Islaamka ay yihiin waxba kama jiraan. Qodobka 14aad, faqradiisa 3aadna waxay sheegaysaa in wadanka ay mamnuuc ka tahay in laga hirgeliyo bangiyo ku shaqeeya ribo.

Haddaba, waxa cajiib ah in Golayaasha Somaliland uu horyaalo xeer dadka ribo u banaynaya. Cunista ribada waxa ka khatar badan

qofka sharciyeynaya. Waxan leenahay dadkaasi aakhiradooda iyo diintooda ha u tudhaan.

**Gabo-gabo:**

Cid kasta oo sharciyadan la wad-wado ku lug leh waxan leenahay in ay dhegeystaan hadalka Illaahay (swt) oo fahmaan. "**Kuwa Illaahay iyo rasuulkiisa rumeeyow, Illaahay ka cabsada, kana taga Ribada wixii hadhay hadaad iimaan leedihiin**"

# QAYBTA 3-AAD

# "Waxyaabaha u Gaarka ah Dhaqaalaha Islaamka"

# "خصائص الإقتصاد الإسلامي"

**Soo-Jeedinta: Sheekh Ciise Maxamuud Cabdilaahi**



# Muxaadarada 3-AAD

## Waxyaabaha u gaarka ah Dhaqaalaha Islaamka

Waxanan halkan idiinku soo gudbinaynaa Mowduucii 3aad ee Nadwadii xidhiidhka ahayd ee ciwaankeedu ahaa **"Nidaamka Dhaqaalaha Islaamiga ah iyo Saamaynta uu ku leeyahay Bulshada"** oo ka socota Masjid Cali Mataan 02 April – 07 April, 2014.

Waxana qoraalkan laga diyaariyay Muxaadarada ciwaankeedu yahay "Waxyaabaha uu Gaarka la yahay Dhaqaalaha Islaamka" – waxana soo jeedinaya Sh. Ciise Maxamuud Cabdillaahi.

Sheekhu wuxuu ku furfurtay mawduuciisa tilmaanta ahmiyadda uu leeyahay dhaqaalaha Islaamku iyo sidii u horseedi karo badhaadhe adduun iyo barwaaqo Aakhiro.

Sheekhu wuxuu tilmaamay in Nidaamka dhaqaale ee Islaamku uu ka gedisan yahay dhamaan nidaamyada kale ee dunida ka shaqeeya isla markaana uu leeyahay astaamo cad cad oo ka soocaya habdhaqamada dhaqaale ee dunida laga isticmaalo. Waa nidaam uu

hage iyo hogaamiye ka yahay Rabbigii unkay adduunyada isla markaana uumay waxa dul saran

**Waxaynu si Kooban u Xusi Doonaa Astaamahaasi oo Qodobaysan:**

1. **Dhaqaalaha Islaamku waa dhaqaale ku xidhan caqiidada iyo rumaynta Eebe:** waxaynu wada ogsoonahay in bulshooyinka adduunka ku nooli ay ku dhaqmaan nidaam-dhaqaale ka turjumaya waxay rumaysan yihin. Sidaa daraadeed, nidaamka dhaqaale ee Islaamkuna waa mid ka turjumaya hirgelinta hanaan maaliyadeed oo Islaamku ogolyahay. Waxaynu in badan ku arkaynaa Quraanka kariimka iyo Sunnada Nabi Muxammed (SCW) nusuus badan oo uu Eebe SWT kula hadlayo dadka muuminiinta ah kuna farayo hab dhaqanka dhaqaale ee Islaamku sharciyeeyey. Ujeedada iyo hadafka aynu ku bidhaansanayno dhaqaalahani waa inaynu Rabbigeen ku raali galino kuna raadino naxariistiisa iyo danbi-dhaafkiisa.
2. **Dhaqaalaha Islaamku waa Dhaqaale waaafaqsan Shareecada Islaamka:** Shareecada Islaamku waxay aadamaha u diyaarisay waxay ku hagaagayso noloshooda adduun iyo ta aakhiraba. Dhamaan qawaacida iyo tiirarka dhaqaalaha Islaamku waa kuwa ka turjumaya ama waafaqsan ujeedada iyo ahdaafta Shareecada Islaamka waana dhaqaale ku suntan ku dhaqanka iyo ilaalinta shareecada Islaamka.
3. **Dhaqaalaha Islaamku waa dhaqaale ku dhisan Akhlaaq:** Nidaamka dhaqaale ee Islaamku waa nidaam ku dhisan dhaqan wanaag iyo akhlaaqda Islaamku asteeyey taasoo ay amaanadu u horayso. Waa nidaam dhiirigelinaya dhaqangelinta dhamaan dhaqanka wanaagsan, sida runsheega,

amaanada, ka fogaanta khiyaanada iyo wax is daba marinta marka lagu jiro hawlaha ganacsi ama dhaqaale. Rasuulkeenii Suuubanaa (SCW) wuxuu tilmaamay in Ganacsadaha wanaagsani uu saf la noqon doono Maalinta qiyaame anbiyada, sidiiqiinta iyo shuhadada. Waxa kale oo uu rasuulkeenu (SCW) ammaanay una duceeyey qof kasta oo samafala markuu wax iibsanayo, iibinayo ama dayn qaadanayo.

4. **Dhaqaalaha Islaamku waa Dhaqaale dheelitiraya Danta Gaarka ah iyo Danta guudba:** Waa dhaqaale saamaxaya in la horumariyo Maslaxada Qaranka iyo ta qofkaba, ama hadaynu si kale u nidhaahno waa dhaqaale miisaamaya Mudnaanta Nolosha Aakhiro iyo ta aduunyada. Waa dhaqaale ogol in laga shaqeeyo Masaalixda gaarka ah iyo ta guud iyodoo la isu miisaamayo mudnaanta iyo muhiimada ay arimuhu kala leeyihiin.
5. **Dhaqaalaha Islaamku waa dhaqaale Bani Aadminimo:** Waa dhaqaale ilaalinaya xuquuqda qofka iyo ta qaranka labadaba. Waa dhaqaale udub dhexaadkiisu yahay xaqiijinta maslaxada bani aadamka. Khaliifkii Muslimiinta ee Cumar Binu Khadaab ayaa maalin la kulmay Oday gaboobay oo Yuhuudi ah oo dawarsanaya. Odaygii Cumar wuxuu weydiiyey waxa uu raadinayo ee gurigiisii ka keenay. Odaygii wuxuu sheegay inuu iska bixin kari waayey Jisyadii laga rabay isla markaana uu raadsanayo wuxuu ku noolaado. Cumar Bin Khadaab wuxuu amar ku bixiyey in ninkaas iyo wixii la mid ahba laga dhaafo jisyada, bangiga muslimiintana laga siiyo waxay ku noolaadaan. Sidaa daraadeed, nidaamkani waa nidaam sama-faleed dhawraya nolosha iyo noolaanshaha bani-aadamka.

6. **Dhaqaalaha Islaamku waa dhaqaale dhawraya Usuusha diinta Islaamka isla markaan horumarinaya qaybaha kala duwan ee nolosha bani-aadamka:** Waa nidaam ogol ka faa'iidaysiga daraasadaha casriga ah ee waxtarka u leh Bulshada isla markaana aan ka hor imanayn Shareecada iyo qawaaniinta guud ee Islaamka. Ka faa'iidaaysiga tijaabooyinka bani aadamku waa aragti uu ogol yahay nidaamka Islaamku marka la fuliyo shuruudahan hoos ku xusan:

    - Waa in maslaxad caam ahi ugu jirtaa bulshada.
    - Waa inuu waafaqsan yahay Shareecada Islaamka.
    - Waa inaanu dhaawicin astaamaha dhaqaalaha Islaamka.

**Gunaanad**

Wadan ahaan dhaqangelintu nidaamka bangiyada ribada ku shaqeeyaa waxay si toos ah uga hor imanaysaa Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland. Tusaale ahaan, Qodobka 14aad, Faqradiisa 3aad waxay si cad u tilmaamaysaa in aan dalka laga samayn karin bangiyo ku shaqeeya Nidaamka Ribada.

**<u>Talo Soo Jeedin:</u>**

Waxaynu u soo jeedinaynaa Xubnaha golaha wakiilada inay aad uga feejignaadaan cawaaqibka ka dhalan kara ansixinta iyo hirgelinta xeerka bangiyada Ribada

# QAYBTA 4-AAD

## “Shaqaysiga Xalaasha ah iyo Is-taageeridda Bulsho”

## ”الكسب الحلال والتكافل الإجتماعي“

**Soo-Jeedinta: Sheekh Maxamed Cali Jaamac (Gadhle) iyo Sheekh Cabdiraxmaan Axmed Aw Cabdi**





# Muxaadarada 4-AAD

## Shaqaysiga Xalaasha ah iyo Is-taageeridda Bulsho

Waxanan halkan idiinku soo gudbinaynaa Mowduucii 4-aad ee Nadwadii xidhiidhka ahayd ee ciwaankeedu ahaa **"Nidaamka Dhaqaalaha Islaamiga ah iyo Saamaynta uu ku leeyahay Bulshada"** oo ka socota Masjid Cali Mataan 02 April – 07 April, 2014.

Waxana qoraalkan laga diyaariyay labada Muxaadiro ee **"Shaqaysiga Xalaasha ah iyo Takaafulka Bulsho"** – waxana soo jeedinaya Sh. Maxamed Cali Jaamac (Gadhle) iyo Sh. Cabdiraxmaan Axmed Aw Cabdi.

**MUXAADARADA 1-AAD:**
**Sheekh Maxamed Cali Jaamac (Gadhle)**

Maxaadarada hore ee "shaqaysiga xalaasha ah" ayaa sheekhu waxa uu ku bilaabay in qofka bani aadamka ahi uu siyaabo

badan xoolo iyo hanta u kasban karo, laakiin qofka mar haddii uu yahay qof Muslim ah waxaa lagama maarmaan ah in waxa uu kasbanayo ama uu shaqaysanayo iyo waxa uu quudanayaba ay noqoto wax xalaal ah. Mawduuca waxa uu u qaybsami doona laba qaybood oo kala ah:

1. Hordhac, iyo
2. Sharciga ay shareecada Islaamku u dhigtay **"kasbul xalaal amma shaqaysiga xalaasha ah."**

## HORDHAC

Qof kasta oo Muslim ah waxaa ku waajib ah in uu kasbado oo uu cuno waxa xalaasha ah, kana dheeraado waxa xaaranta ah isaga oo Illaahay SW qof ku waxa uu cunayo ama uu kasbanayo ka horeeysiiyay camalka wanaagsan ee uu samaynayo.
Wakhtigan hadda oo ah wakhti aakhiru samaan ah oo ay dhabawday wakhtigii uu nabi Muxamed sheegay ee uu yidhi: "Waxa iman doonta wakhti aanay dadku xoolahooda ay kasbadaan aanay u kala saari doonin xalaal iyo xaraam, muhiimna aanay u ahayn xaga uu ka kasbanayo, ee ay muhimadiisu tahay uun in uu xoolo kasbado."
Nusuus badan ayaa ku soo arooray halka uu qofku ka kasbanayo xoolaha uu shaqaysanayo. Illaahay muuminiinta isaga oo la hadlayana waxa uu yidhi: "Kuwi Allah iyo Rasuulkisaba rumeeyayow waxaad cuntaan waxa aan idinku arsaaqnay kuwiisa wanagsan ee xalaasha ah." Illaahay waxa kale oo uu yidhi: "Kuwa

Allah iyo Rasuulkisaba rumeeyayow xoolihina dhexdiina ha ku kala cunina shay badil ah oo xaraam ah." Waxa kale oo rasuulka CSW laga soo wariyay xadiis oo nabigu yidhi: "Janada gali maayo hilib ku biqlay oo ku kabcay xaraam." Xadiis kale ayuu nabigu ku sheegay: "Ma siyaado oo ma kobco hilib ku kobcay xaraam ilaa naarta ayaa huran."

## DAWAABIDA AMA SHARCIYADA UU LEEYAHAY SHAQAYSIGA XALAASHA AH:

1. **Xaaraantinimaynta Ribada:** Waxa uu Illaahay kitaabkiisa ku sheegay in uu iibka inoo xalaaleeyay waxa ribada la yiraahdana la inaga xaraantinimeeyay. Rasuulkuna waxa uu nacdalay qofka ribada cuna, ka cunsiiya, ka qoraya iyo ka markhaatiga ka ahba, Illaahayna jannada ka xaraantinimeeyay. Ribada marka sidaas loo xaraantinimeeyay, waxa ka soo baxaya in ay xaaran tahay in aad ka shaqayso bangiyada ribada ku shaqeeya shaqada aad ka qabanaysa nooca ay doonto ha noqotee. Ribada ayaa u qaybsanta laba nooc oo kala ah**: Ribada ama siyaadada lagu sameeyo wixii adduunyo lagugu leeyahay oo la kordhinayo wakhtigi kordhaba iyo ridaba iibka.**
2. **Xaarantinimaynta Khiyaanada iyo qishka**: Rasuulku SCW waxa uu inaga xaarantinimeeyay qishka iyo khiyaanada, isaga oo rasuulku sheegay qofka wax kasbanaya in uu iska ilaaliyo khiyaanada. Tusaalayaasha hadda qishka wakhtigan danbe la sameeyo ayaa waxa ka mid ah:
   a. Iibinta alaabada xumaaday amma wakhtigi loogu talo galay dhacay,

   b. In miisaanka lagu ciyaaro oo shayga misaan ku jirin lagu sheego,
   c. In lagu suuq geeyo badeeco iyo alaab liidata in ay tahay badeeco wanaagsan,
   d. Iibinta badeeco sixada iyo cafimaadka waxyeelaynaya.
3. **Xaarantinimaynta ka ganacsiga waxyabaha xaraamta ah sida Khamriga iyo Mandooriyayaasha oo dhan**: Waxa iyaguna la xaaraantinimeeyay ka ganacsiga waxyaabaha xaraanta ah sida in laga ganacsado khamriga ama in hub la soo galiyo suuqa wakhtiyada fitanka.
4. **Xarantinimaynta ka ganacsiga filimaanta iyo waxyaabaha xun xun:** Waxa iyadana la xaaraantinimeeyay in dadka loo soo daayay filimaan xun xun oo dadka lagu luminayo.
5. **Xaraantinimaynta ka shaqaynta camalada aadan ka gudan karayn wajibaadki Illaahay kugu waajibiyay.**

Gabagabadina waxa uu sheeku tilmaamay in kasbashada xalaashu ay kaga filantahay in aad kasbato xaraan."

**MUXAADARADA 2-AAD**
**Sheekh Cabdiraxmaan Axmed Aw Cabdi**

Maxaadirada Labaad "**Takaafulka Bulsho**" ayaa iyaduna waxa uu sheekhu ku bilaabay in umada Islaamka ahi iskaashiga iyo is xambaarku ka dhaxeeya in ay dusha isku qaado, oo qofka jilicsan ay umada inteeda kale dusha ku qaado oo ay ilaaliyaan. In qof kasta oo bulshada ka mid ahi uu isku arko in uu xuquuq leeyahay wajibaadna looga baahanyahay bulshada

dhexdeeda. Umadda inta ay iskaashi iyo is takulayni dhexdooda jirto waxa ka dhasha is jacayl iyo kalgacayl iyo isa soo dhawaysi. Diinta Islaamkuna waxa ay ina fartay in la isku tiirsanaado oo la is kaashado, isaga oo Illaahay aayad qur'aan ah ku sheegay: "Isku kaashada wanaaga iyo Allah ka cabsiga."

Nusuus badan ayaa ku soo arooray takaafulka bulshada dhexdeeda. Waxa uu Illaahay yidhi: "Wanaaga iyo janada gaadhi maysaan ilaa aad Illaahay dartii waxa aad jeceshihiin u bixisaan." Nabi Muxammadna SCW waxa uu tusaale ka bixiyay sida bulshada Islaamka looga baahanyahay in ay noqdaan, waxa u yidhi: "Isku tiirsanaanta, isku kaalmaynta , is tacaawunka bulshada Islaamka dhexdooda waa sida jidh kaliya, haddii xubin ka mid ahi bukooto in jidhka intiisa kalena la bukoodo ama la xanuunsado." Waxa uu sidoo kale nabigu SCW yidhi: "Qofka ka fududeeya qof kale oo Muslim ah dhib ama hawl haysata, waxa uu Illaahay ka fududeeya dhibta iyo hawsha maalinta qiyaamaha." Waa ayo dadka uu Illaahay ina amray in la kaalmeeyo:

1. **Waalidka**: Illaahay baa waxa uu yidhi: "Labada waalid u sama fala." Waxa la farayaa qofka Islaamka ah in uu kafaalo qaato oo tunka loo rito waxa ugu fadli badan labada waalid.
2. **Qaraabada**: Sida walaalaha, iyo dadkii kale aad qaraabada tihiin in la kaalmeeyo oo la kafaalo qaado.
3. **Agoomaha**: Waxa uu Illaahay sheegay in ay tahay agoomaha oo la kafaalo qaato waxyaabaha Illaahay loogu dhawaado. Nabigu CSW waxa u yidhi: "Qofka agoon kafaalaqaada iyo anigu maalinta qiyaamaha waxanu isku naha sida labada farood ee isku xiga."

4. **Miskiinka**: Waxa kale oo aad u muhiim ah in la takuleeyo oo la kafaalo qaato dadka masaakiinta ah ee bulshada ku dhex nool oo laga war hayo.
5. **Musaafirka ama socotada:** Qofka musaafirka waxa qof walba oo Muslim ah ku waajiba in la marti qaado martida u soo hoyata.
6. **Dadka wax waydiista dadka kale iyo adoomaha,**
7. **Dadka daymaysan (al-Qaarimiin):** Illaahay waxa uu Quraankiisa ku leeyahay qofka qof baahan wax ku lihi in uu ka sugo oo aanu ku dirqin ee uu ka sugo, waxaana ka sii wanaagsan in aad sadaqo ula baxdaan.
8. **Maxaabiista**: Dadka maxabiista ah ee jeelasha ku jira in la caawiyo oo la kafaalo qaato. Meelaha ay ka imanayso waxyabaha dadka lagu kafaalo qaadanayo:
    - **b. Sakada**: sakada laga bixinayo xoolaha, maallka iyo wixi la mid ah. Sakadu waa maalka laga qaado dadka wax hayta lana siiyo dadka fuqarada ah.
    - **c. Sadaqada**,
    - d. **Kafalooyinka** qofka lagu waajibiyay xaaladaha qaarkood,
    - e. **Dardaaranka** uu qofku xoolihiisa ku dardaarmo,
    - **f.** In qofku **waqfi** sameeyo ayaa iyaduna ka mid ah waxyaabaha dadka lagu kafaalo qadanayo,
    - **g. Sakatul Fidri.**

Gabagabadi waxa la faraya bulshada Islaamka ah in ay kafaalo qaado, is takulayso, iskaashato. Wanaaga umaduna in uu ku jiro isku tiirsanaanta iyo is kaashiga bulshada dhexdeeda.

# QAYBTA 5-AAD

# "Guusha Baananka Islaamka & Fashilka Bangiyada Ribada"

# "تجارب واقعية: فشل الإقتصاد الربوي ونجاح الإقتصاد الإسلامي"

**Soo-Jeedinta: Sheekh Almis Yaxye Xaaji Ibraahim**



# Muxaadarada 5-AAD

## Guusha Baananka Islaamka & Fashilka Bangiyada Ribada

Waxanan halkan idiinku soo gudbinaynaa Mowduucii 5aad ee Nadwadii xidhiidhka ahayd ee ciwaankeedu ahaa **"Nidaamka Dhaqaalaha Islaamiga ah iyo Saamaynta uu ku leeyahay Bulshada"** oo ka socota Masjid Cali Mataan 02 April – 07 April, 2014.

Waxana qoraalkan laga diyaariyay muxaarada **"Guusha Baananka Islaamka & Fashilka Bangiyada Ribada"** – waxana soo jeedinaya Sh. Almis Yaxye Xaaji Ibraahim.

Waxa uu sheekhu ku bilaabay muxaadarada ahmiyadda xoolahu ay ku leeyihiin Islaamka waxana ka mid ahaa hadaladiisii:

Dhaqaale kolka laga hadlayo waxa loo jeedaa waa xoolaha ama maalka. Islaamkuna xoolaha meel ayuu dhigay, Waxana Islaamku xoolaha u yaqaanaa in ay laf-dhabar u yihiin nolosha, sida ku cad aayadda suuratu Nisaa' ee macnaheedu yahay: **"Xoolahiina ha u dhiibina oo ha u gacan gelinina inta maangaabka ah, xoolahaas oo Ilaahay laf-dhabar idiinka dhigay".**

Sidoo kale Xadiiska uu Nabi Muxammad (SCW) ku sheegay: *"Wacanaa oo fiicanaa xoolo xalaal oo gacan qof wanaagsan ku jiraa."* Sidoo kale Xadiis kale ayaa sheegayay in ay ka mid tahay calaamadaha lagu garanayo in qiyaamihii soo dhawaaday in xooluhu ay gacanta u galaan dadka inta ugu xun.

Waxa uu sheekhu ka waramay dhacdooyin uu ku xoojinayay aragtida qiimaha ay xooluhu leeyihiin, iyo marka xooluhu ay gacanta u galaan cid wanaagsan oo ku habboon sida ay waxtar u leedahay, waxana uu ka sheegay dhacdooyin hore oo dhacay waqtigii Nebi Muxammad ilaa hadda oo aynu noolnahay.

Waxa intaas kadib sheekhu galay in adduunka ay ka jiraan laba aragtiyood oo iska soo horjeeda iskuna haya adduunka aynu ku noolahay oo udub dhexaad u ah. Aragti ayaa sheegaysa in dadku ay udub dhexaad u yihiin dunida oo sida ay rabaan ay ka yeeli karaan, Aragtida kalena waxay leedahay adduunka waxa udub dhexaad u ah Allah.

Aragtida hore ee sheegaysa in adduunka aadamuhu ka taliyo ayaa waxa ka farcamay oo ka soo hoos baxay labada qolo ee kala ah: Hanti-wadaag iyo Hanti-goosad. Dhanka kalena, aragtida sheegaysa in adduunkan uu udub dhexaad u yahay Rabbiga weyn ee abuuray ayaa waxa rumaysan dhammaan dadka Muslimka ah.

Islaamku marka uu dhaqaalaha ka hadlayo waxa uu qofka aadamaha ah u ilaaliyaa oo ugu muhiimsan, qofka uu si adag u sheegay in looga haqabtiro nafta, diinta, xoolaha, caqliga iyo taranka. Kadibna waxa uu Islaamku ilaaliyaa waxyaabaha aanu qofku la'aantood noolaan karin sida cuntada, hoyga iyo waxa uu

raacayo. Ugu danbayna waxa qofka loo ilaaliyaa waxyaabaha intaas kasoo hadhay.

Ugu danbayn Islamku marka loo eego aragtida hanta-wadaaga ee ah in wax kasta la wada leeyahay, iyo marka loo eego hanta-goosadka ah in dawladdu wax leedahay waxa uu qaatay aragti u dhaxaysa labadaas aragtiyood ee kala jaadka ah, taas oo ah in qofku wax yeesho sidoo kalena dadka inta maatida ah ee aan waxba haysan ay dawladdu masuul ka noqoto.

Ugu danbayn sheekhu waxa uu ka warramay in dalal badan oo maanta adduunka ka jira kolkii ay ku hungoobeen bangiyadii ribada u digo rogtay qaab aan ribo lahayn. Waxana uu sheekhu tusaale u soo qaatay dalka Japan oo laga soo bilaabo 2010 waxyaabaha ay ku shaqaynayeen oo dhan u badalay faa'ido la'aan taas oo macnaheedu yahay nidaamkii Islaamka, balse aanay afka uun ka sheegin in ay qaateen nidaamka Islaamka. Sidoo kale dalka Ingiriiska ayaa dhawaanahan ku foognaa in ay bangiyada oo dhan ka furaan qaybo ku shaqaynayaa nidaamka Islaamka.

Waxa kale oo uu aad ugu dheeraaday sheekhu in 1925 ay dhammaan reer Yurub ay isla qaateen in ribada laga dheeraado balse ay Yuhuuddu markii ay nidaamka lacagta adduunka gacanta ku dhigeen ay dib usoo celiyeen. Waxa kale oo uu sheekhu aad uga warramay in gaaladu kolkii ay kusoo fashilmeen nidaamkii ribada in ay hadda ka soo jeesteen.

Waxa kale oo sheekhu aad uga digay in maanta aynu dib ugu noqonno halkii ay reer galbeedku ku soo jabeen, waxana uu kusoo gabagabeeyey nidaamka Islaamka iyo sida uu guul u gaadhay iyo talooyin badan oo uu usoo jeediyay bulshada iyo sida ay u mudan

tahay in nidaamkaa Islaamka ee guusha laga gaadhay loogu dhaqmo kan lagu jabayna looga dheeraado.

# QAYBTA 6-AAD

## “Dood Cilmiyeed ku saabsan Somaliland: Baananka Ribada ah & kuwa Islaamiga ah”

## ”حلقة نقاش: صومالي لاند بين البنوك الإسلامية والبنوك الربوية“

**Soo-Jeedinta: Sheekh Maxamed Salaan, Prof Mubaarak Ibraahim Aar, Sheekh Maxamed Cali Biixi & Sheekh Xasan Cabdi Salaan**










# Muxaadarada 6-AAD

## Dood Cilmiyeed ku Saabsan: Somaliland: Baananka Ribada ah & Kuwa Islaamiga ah

Waxanan halkan idiinku soo gudbinaynaa Mowduucii 6aad ee Nadwadii xidhiidhka ahayd ee ciwaankeedu yahay "Nidaamka Dhaqaalaha Islaamiga ah iyo Saamaynta uu ku leeyahay Bulshada" oo ka socota Masjid Cali Mataan 02 April – 07 April, 2014.

Waxana qoraalkan laga diyaariyay muxaarada " Dood Cilmiyeed ku saabsan: Somaliland: Baananka Ribada ah & kuwa Islaamiga ah " – waxana ka qayb-galaya Sheikh Xasan Cabdisalaam, Mr. Mubaarig Ibraahim Aar, Sh. Maxamed Cali Biixi iyo Sh. Maxamed Salaan Cali.

### SH. MAXAMED SALAAN CALI

**Su'aal:** Sidee Ayay Taaiikh Ahaan Baananka Islaamiga Ahi Ku Bilaabmeen, Uguna Fideen Dunida, Waa Maxayse Guulaha Ay Soo Hooyeen?

**Jawaabta:** Taariikh ahaan hay'ad maaliyadeed oo "Bank" ahi waxay dunida ka curatay muddo laba qarni ku siman. Dalka Talyaaniga ayaa ugu horeeyay wadan laga hirgaliyo Bangi sanadkii 1873-kii. Dunida Islaamka ah Bangiyada ribada ku shaqqyaa (Conventional Banks) waxay soo galeen xilligii gumaysiga reer galbeedku ka talinayay.

Bangitada Ismaali ah: waxa looga jeedaa Hay'ad maaliyadeed oo ka shaqaysa hawlo bangi oo ku qotoma Sharceeda Islaamka. Taariikh ahaan, Bangiyada islaamiga ahi waxay ku bilaabmeen muslimiinta oo dareemay culayska ribada ee dhaqaalahoogii ku salaysan yahay. Xilligaas ayaa aqoonyahano muslimiin ahi u guntadeen sida ay muslimiinta ugu soo celin lahaayeen hanaankoodii dhaqan – dhaqaale (Socio Economic) ee ku salaysnaa caqiidadooda.

Waqtigaas, isticmaarku wali awoodiisii ayuu lahaa, aqoon xooganina ma jirin. Bilowgii 1940-kii ayaa dalka Malaysia oo ah hormoodka nidaamka dhaqaalaha islaamiga ah laga bilaabay Bangi kayd ah oo Islaami ah (Saving Bank). 1950 –kii ayaa loo gdbay hanaan manhaji ah oo uu yeeshay nidaamka bangiyada Islaamiga ahi, waxaana laga bilaabay Pakistan bangiyo maalgalineed oo u shaqaynaya hanaanka Islaami ah.

Dadaaladii ugu dhabaysnaa ee Bangiyada Islaamiga ahi waxay ka bilaabmeen Dalka Masar, Bangiyo kayd (Saving Banks) u adeegga dadka beeralayda ah ayaa bilaabmay. Bangi la odhan jiray Naasir Al Ijtimaaci ayaa isna bilaabay ururinta ZAKADA iyo QARDUL XASAN.

Sanadihii 1970-kii ayaa si xoogan fikirka Baananka Islaamiku u fiday. 1974-kii waxa la sameeyay Saudi Islamic Bank, 1975-kii waxa

furmay Dubia Islamic Bank, 1977 waxa dalka Sudan ka furmay Faysal Islamic Bank, kadib ayaa Kuwait, Masar iyo Urdun iyo dalal badan oo kale ay ka bilaabantay.
Fikirkii Bangiyada Islaamiga ah dunida ayuu u gudbay, iyadoo xitaa bangiyadii gaaladu fursado ganacsi ka arkeen. Waxa furmay Islamic Windows ama laamo nidaam islaami ah ku shaqeeya.

Waxa jira tirakoobyo badan oo lagu sameeyay Bangiyada islaamiga ah iyo heerkooda horumarka dhinacyada tiradooda, wadamada ay ka shaqeeyaan, xadiga kobocooda, kaydka ay hayaan, hantida ay leeyihiin, maalgalinta ay sameeyaan iyo xitaa Islamic windows-ka ay sameeyeen Baananka ribada ah.
Ahmiyadda nidaamka dhaqaale ee islaamku leeyahay waxa cadaynaya dhaqaale burburada waawayn ee dunida dhaqaaleheeda ku dhaca eek ii ugu waynaa ahaa kii 1929 – 33 iyo kii 2008 ee Bangiyada maraykan badidoodii baabi'iyay muu saamayn dhaqaalaha islaamiga ahi, sida ay xaqiijiyeen daraasado ay sameeyeen IMF iyo World Bank.

Xilligan aan joogno Jaamacadaha dunida ugu waawayn iyo xitaa ardaydii gaaldu waxay bartaan Nidaamka Dhaqaalaha Ismaamiga ah iyagoo u arkay dantooda iyo danta dhaqaalohooga. Shirkii London ee uu furay Raysal Wasaaraha Ingiriisku waxa uu balan ku qaaday inay la tartanmaan Dubia oo London ay noqoto caasimadda Dhaqaalaha Islaamka ku salaysan. Waxa halkaas ku cad in maslinka aanay u haboonayn inay meel ay ku soo daaleen gaaladii aynaan dib ugu noqon.

**Mr. MUBAARIK AAR**

**Su'aal:** Dastuurka Soomaliland Iyo Xeerka Baanka Dhexe Siday U Arkaan In Wadanka laga hirgaliyo Bangiyo Ribo Ku Shaqaynaya?

**Jawaabta:** 25-kii Jan, 2014 ayaa baarlamaanka la soo hordhigay xeer loogu magac daray Xeerka Baananka Ganacsi iyo Hay'adaha maaliyadeed. Xeerkan waxa loogu talo galay in lagu maamulo Bangiyo Ribada ku shaqeeya. Bandhigii 1aad ayaa la sameeyay, doodiisana waxa loo balansan yahay 20-ka April ee inagu soo socota.

Hadaba xeerkani muxuu xambaarsan yahay, ma lajaan qaadayaa Dastuurka Somaliland iyo xeerarka kale ee Somaliland ka dhaqan galka ah?

Xeerarku marka qaanuunka laga hadlayo waa saddex nooc:

1. Xeerar Aasaasi ah oo ay tahay in Xeer walbaa waafaqo: waana Dastuurka
2. Xeerarka Baarlamaanku Sameeyaan, kuwaas oo ay tahay shardi inay waafaqaan Xeerka Aasaasiga ah ama Dastuurka isla markaana aanay ka hor iman kuwa ka hooseeyaa.
3. Xeerarka Farciga ah: waa kuwa ay sameeyaan golaha xukuumaddu, iyana waxa waajib ah inaanay waafaqaan xeerarka baarlamaanka ku sameeyay.

Hadaba xeerkan baarlamaanka horyaalla ee Baanan Ribawi ah fasaxayaa ma yahay mid waafaqsan oo buuxiyay nidaamkaas ama Standards-ka caamaliga ah ee xeer dajinta? 10 qodob ayaan u bandhigaynaa kuna qiimaynaynaa xeerkan hadda baarlamaanka, waana sidan:

1. **Cilmi Baadhis ama Research xalinaya mushkilad oo tixgalinaya dhaqanka iyo diinta bulshadaas**. Marka mushkiladii la darso ayaa la yidhaahdaa aan dajino xeer lagu xaliyo mushkiladan. Sidaas awgeed, xeerkan hadda baarlamaanka horyaalaa muu buuxin shardigaas. Waxaan u kuurgalay xeerkan, waxaanan ogaaday in laga soo qaatay dalka Kenya xeerkooda la yidhaa Kenyan Banking Act. Sidaas awgeed, xeerkani maaha mid Somaliland dhaqaya mana aha mid cilmi baadhis ku yimi.
2. **Inuu waafaqsan yahay diinta dalka iyo dhaqankiisa**: Shareecada Islaamka oo xarintay Ribada ayuu xeerkani banaynayaa. Xeerkan gudihiisa waxa ku qoran qodobo badan oo si cad u qeexaya ribada, sida: qodobka 1aad ee qeexaya shaqada Bangi, qodobka 14-aad, faqradda 2aad ee sheegaya dhigaalka, qodobka 11aad oo sheegaya inaanu bangigani ku shaqaynayn ganacsi.
3. **Xeerku waa inuu waafaqaa Distrka Somaliland**: qodobka 5aad ee Distoorka Somaliland iyo qodobka 14-aad intuba waxay mamnuucayaan shareecada Islaamka wax kasta oo khilaafsani inuu yahay mid waxba kama jiraan ah iyo in ribada ku ganacsigeedu reeban yahay sidaas awgeed xeerkani maaha mid waafaqsan dastuurka.
4. **Xeerkasta oo cusubi waa inaanu ka hor iman xeerar kale oo dalku leeyahay**: Xeerkan Baananka Ribadu waxa uu ka hor imanayaa Xeerka Baanka Dhexe Ee Somaliland, gaar ahaan qodobka 3aad faqradihiisa 6aad, 7aad iyo 8aad kuwaas oo si cad u dhigaya saldhigga sharciyadeed ee Baanka Dhexe inuu yahay Axkaamta shareecada Islaamka Iyo In Ribadu tahay mid mamnuuc ah.
5. **Xeer Cusub Marka la samaynayo waa inaan la hayn wax badiil ah oo mushkiladda jirta ama baahida daboolayaa**:

Xeerkan Baananka Ganacsiga loogu magac daray baahi loo qabaa ma jirto, waayo badiilkii ayaa jira. Baananka Islaamiga ah ee xeerkooda uu hore baarlamaanku u ansixiyay ayaa ku filan dalka, iyagoo waliba ku qotoma Axkaamta Shareecada Islaamka. Faqradda 5aad ee xeerka baananka islaamiga ah ayaa qeexaysa in baananka noocan ahi ay qabanayaan dhamaan hawlaha baan ganacsi ah uu qabto.

6. **Xeerku waa inuu noqdaa xeer caam ah oo ka madax banaan dadka samaynaya**: Xeerkan Baananka Ribada loogu talo galay waa mid aad moodo in ciddii samaysay ay isku toshay, awoodo badan oo kii laga soo dheegtay ee dalka Kenya uu siinayay  Wasiirka Maaliyadda iyo Hay'ado kale isaga ayaa isku qoray, maadaama isagu uu diyaarsaday.
7. **Xeerku waa inuu waadax yahay oo kalimaad wax badan xambaari kara laga ilaaliyo**: Xeerkani arintaas wuu baalmarsan yahay, waxa ku jira qaladaad afsoomali ah oo aad u badan, anigu ilaa 50 qaladoo afsoomali ah in kabadan waan ka tiriyay intii aan arkay. Kalmado badan oo u baahan in lagu qeexo dhexdiisu kuma jirto, waxa uu soo celcelinayaa shirkad iyadoo uu si indho la'aan ah u soo qaatay ereyadii Kenya Banks Act iyadoo aragtida shirkad qaanuunka Somaliland iyo ka Kenya ay ku kala duwan yihiin.
8. **Xeerka waa in laga ilaaliyaa Dulmi iyo Cadaalad darro**: xeerkan Baananka Ribada waxa uu awoodo muujinaya cadaalad darro siinayaa Baankadhexe isagoo xuquuqdii dadka kale aan sheegayn, isla markaana aan cadaynayn nidaam loo raaco wixii cabasho ah ee lakala qabo.
9. **Xeerka waa in lagu dhex qeexaa arimaha muhiimka ah ee ay tahay inuu cadeeyo**: Xeerarkan Baananka Ribada arimo muhiim ah oo ay ahayd in dhexdiisa lagu qeexo ayaa lifaaqyadiisa lagu sheegay sida: Raasamaalka looga baahan

yahay Bangiga, Deposit-ka laga qaadayo iwm. Dhamaan arimahaasi xeerka Baananka Islaamiga ah dhexdiisa ayay ku xusan yihiin halka lifaaq looga dhigay kan.

10. **Xeerka la samaynayaa waa inuu yeeshaa la xisaabtan**: su'aasha iswaydiinta leh ayaa ah, xeerkani awoodo aad u badan oo qaarkood aanay sax ahayn ayaan Baanka Dhexe uu siiyay, haddaba, yaa la xisaabtamaya? Ma lagu cadeeyay xeerka? Jawaabtu waa maya.

Marka la soo ururiyo xeerkan Baananka Ribada ee baarlamaanka horyaallaa 10-kaas qodob oo ah nidaamka xeer cusub loo maro midna ma waafaqin, balse waabu ka hor imanayaa Axkaamta Shareecada Islaamka, Dastuurka Somaliland, Xeerka Baanka Dhex, mana aha mid baahi keentay ee waa mid badiilkiisa yaallo. Sidaas awgeed baarlamaaka soomaliland waa inaanay ansixin, hadii ay ansixiyaan madaxwaynu waa uu soo celin karaa, hadii xitaa ay 2/3 ugu codeeyaan waxa loo gudbinayaa Maxkamadda Sare oo la waydiin doonaa inuu Dastuurka waafaqsan yahay iyo in kale. Taasina waa midh cad oo qodobo aad u badan oo dastuuri ah ayuu ka hor imanayaa.

## SH. MAXAMED CALI BIIXI

### Su'aal: Maxay Tahay Saamaynta Ay Leedahay Iyo Khatarta Ku Jirta Sharciyaynta Ribada?

**Jawaabta:** Ugu horayn, magacyada ilaahay C.W iyo sifooyin-kiisa suuban waxa kamid ah: Al Caliim, Al Xakiim iyo Al Khabiir. Ma jirto cid khiyaar u leh inay wax Alle C.W aanu ogolayn samaysan karta. Ilaahay waxa uu xaraantinimeeyay Ribada, waana

shayga kaliya ee Allaah dagaal uu ugu goodiyay cidda ku dhaqanta. Todobada dambi ee ugu waawayn ayay kamid tahay Riba cunistu.

In sharciyad fasaxaysa loo sameeyo Ribada iyo ku ganacsigeeda muxuu xukunkeedu noqonayaa sharci ahaan?

Ugu horayn, In wax la xalaleeyo, waxna la xaaraantinimeeyaa waa Sharci garayn, Sharcina Allaah ayaa xaq u leh lana gaar ah. Cidda dadka wax u xalaalaysa ama wax ka xaaraantinimaysaa waa cid ilaalay isku dhererisay. Yuhuudda ayaa ilaahay qur'aanka ku sheegay inay cubaadoodii iyo culimadooda Ilaahyo ka dhigteen. Rasuulka S.C.W ayaa nin saxaabi ah oo yuhuudi ahaan jiray ku yidhi: "Rasuulkii Ilaahayoow maanaan caabudi jirin". Rasuulka ayaa ku yidhi "mar haday wax idiin xalaalayn jireen, waxna idinka xaaraamayn jireen, cibaadada aad caabudi jirteen waa taas". Aayadda iyo xadiiskaasi waxay cadaynayaan inay gaalnimo tahay in la sharciyeeyo wax ilaahay xaaraantinimeeyay.

Soomalidu hore ayay u eeday  sharci khilaafsan diinta islaamka, xeerkii qoyska ee kacaankii hanta wadaagga ahaa ee Soomaaliya ayaa tusaale u ah dhibtiisiina waa taas ilaa iminka soomali haysa. Dadka qaar ayaa yidhaahda Bangiyada Ribadu Sucuudiga way ka jiraan, Mufti Masar ayaa ka hadlay. Waxaan leeyahay xaaraani waa xaaraan, culimada simbiririxadooda lama eegto. Culimo Azhariyiin ah oo badan ayaa sida uu uga hadlay si ka duwan ugu hadlay.

Ugu dambayntii, waxaan leenahay "Al Muslimuuna Calaa Shuruudihim" ninkii keena dalka waxii lagu heeshiiyay wax ka duwan iyagaa eedi.

**SH. XASAN C/SALAAN**

Waxaan aad ugu faraxsanahay Dawradan cilmiga ah ee Iftiiminaysa muhiimadda dhaqaalaha Islaamiga ah iyo dadii dadku dhaqan ka dhigtaan dhaqaale aan ahayn ka Allaah ogolayn khasaaraha ka yimaadda.

Maxay culimadu isugu taxalujisay inay fariintan inoo soo gudbiyaan, Maxaynuse ka dhaxlaynaa fariintan?

Culimadu waxay gudanaysay masuuliyad saaran, wax isu sheegiddu waa mid waajibku ah dadka islaamka ah si loo badbaado. Culimaduna waxay arkayaan khatar inagu soo fool leh waanay inooga digayaan, waana dhaqanka dadka islaamka ee Allaah ku ammaanay. Umadda islaamka ahi markii ay khaladka iska qaban wayday ee madaxdii loo nasteexayn waayay ayay mushkilad oo dhami bilaabantay.

Sidaas awgeed, laga bilaabo maanta cid kasta oo arintan Ribada iyo Sharci u samaynteeda wax ka qaban kartaa Madaxda ugu saraysay iyo kuwa ugu hoosaysaba ha ahaadaane in arntaas wax laga qabto, waayo culimadu nasteexo ayay inoo soo jeedisay danteena iyo amnigeena ayaana ku jira in la raaco lana weeleeyo.
Culimadu waxa ay isugu dhibaysaa arintan waayo in la sharciyeeyo wax ilaahay axaaraantimeeyay wa arin adag, imaanka ayaa ku xidhan, hadii ay dadku Ribada ka tagi waayaan imaankooda ay sheeganayaan ayaa iswaydiin leh. Camalka qofka in la aqbalo iyo inaan la aqbalin waxa uu ku xidhan yahay xalaal quudashada.

Waxaan ku baraarujinaynaa cid kasta oo ka qayb qaadan karta inay umadda ka horjoogsato wixii aan ilaahay ogolayn inay doorkeeda ka qaadato.

**Wixii talo & tusaale ah ku soo hagaaji:**

Website: www.dhaqaale.ml
Email: dhaqaalaha.islaamka@gmail.com



Sheekh Maxamed Cumar Dirir



Sheekh Cabdiqani Xussen



Sheekh Maxamed Cali Gadhle



Sheekh Ciise Maxamuud



Sheekh Cabdiraxmaan Axmed



Sheekh Almis Yaxye



Sheekh Xasan Cabdisalaan



Sheekh Maxamed Cali Biixi



Sheekh Maxamed Salaan



Mr. Mubaraak Ibraahim Aar